



Taariikhda: 30ka Juun, 2021

Talooyinka Wakaaladaha Gaadiidka

Talooyinkaani maahan qasab, laakiin wakaaladaha gaadiidka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay raacaan.

Wakaaladaha gaadiidka waxaa looga baahanyahay inay:

- U hogaansanaanta Xarumaha Xakameynta iyo Kahortaga Cudurrada [Shuruudaha looga baahanyahay Dadka inay Xirtaan Maskarooyin Inta ay ku jiraan Wadooyinka iyo Xarumaha Gaadiidka](#)
- (Janaayo 29da, 2021), dhaqangalaayo Febraayo 1da, 2021, taas oo ay ku jiraan:
 - looga baahanyahay qof walba labo (2) sanno ama da'da ama ka weyn inay xirtaan maaskaro ee buuxiyaa shuruudaha faderaalka
 - Sameynta dadaalka ugu wanaagsan ee lagu qaadayo kaliya shaqsiyaadka xiran maaskarada (gaashaanka wajiga kaligii looma ogola sida waafaqsan amarka faderaalka illaa qofka uu qabo curyaannimo sida lagu qeexay oo waafaqsan Xeerka Naafada ee Mareykanka (ADA))
 - Sameynta dadaalada ugu wanaagsan ee si badbaado ah aad uga saartid shaqsi walba oo diidayo inuu u hogaansamo sharuuda maaskarada ee fursada ugu horeyso.
- U hogaansanaanta dhammaan Badqabka Shaqooyinka Ku habboon iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OR-OSHA) [shuruudaha](#).

Qeexitaano: Ujeedooyinka loogu talagalay tallooyinka, qeexitaanada so socda ayaa quseeyo:

- “Nadiifin” ama “Nadiifinta” waxaa loola jeedaa isticmaalka saabuun ama wasakhtireyaal iyo biyo sagxadaha Kore si loo yareeyo ama looga saaro jeermisyada sagxadaha sare, yareynta khatarta faafitaanka cudurka sagxadaha korkooda.

Wakaaladaha gaadiidka laga yaabaa:

- Istickmaalka kala qeybinta jireed ama baaqyada muuqaalka (tusaale ahaan, istiikarada dhulka, sharootada midabeysan, ama aastaamaha) oo ka niyad jabiyo rikaabka inay joogsadaan meel u dhaxeeyso lix (6) fiit ee darawaliinta.
- Wixii nidaamyada tareenka, inay dhejiyaan mugga ugu badan ee tareen walba iyada oo la isticmaalayo calaamado waadax ah, oo sigaar ah loo meeleeeyay. Samey ku dhawaaqyo hadal ah oo ku saabsan mugga ugu badan joogsi walba ka hor iyo kadib.

- Ku dheji calaamado waadix ah, oo ku qoran wax ka badan hal luuqad, (oo laga helo healthoregon.org/coronavirus) oo joogsiyada ku meelgaarka xarumaha qorayo astaamaha COVID-19, oo weydiinayo gaadiid wadayaasha qabo astaamaha inay guriga joogaan, iyo cida lala soo xiriirayo haddii ay u baahan yihiin caawin. Haddii qof qabo astaamahan ay tahay inuu safro, fadlan isticmaal gaadiid kale, haddii la heli karo.
- Siiyaan shaqaalaha gaadiidka saabuun, biyo nadiif ah oo socdo, iyo agabyada qalajinta, ama ugu yaraan jeermisdilaha ku saleysan khamriga boqolkiiba 60-95% oo la dhigo goobtooda shaqada.
- Fulliyaan hal dhinac socod iyada oo baabuurka laga galayo albaabka hore lagana baxayo albaabka dambe.
- Ku isticmaalaan calaamado boosteejooyinka baabuurta si ay u dhiirogeliyaan kala fogaanshaha jireed marka la sugayo baska/tareenka.
- Ku rakib saldhigyo jeermisdilaha gacmaha oo ka kooban boqolkiiba 60-95% khamri oo faraxal ah bas/tareen walba illaa iyo xadka suurtoogalka ah.
- Tixgeligelinta hagaajinta xadeyn caaga oo cad oo u dhaxeeyso darawalka iyo rikaabka.
- Aasaasaan xeer iyo hab dhaqan lagu bixinayo gaadiid kale oo loogu talagalay raacayaasha xanuunsan oo u baahan gaadiid ay ka helaayaan daryeel caafimaad kaasi oo xadidayo suurtoogalnimada in cudurka soo gaaro shaqaalaha gaadiidka iyo xubnaha kale ee bulshada.

Ilooyin Dheeraad ah:

- [Shuruudaha CDC ee loogu talagalay Maaskarooyinka Wajiga ee Wadooyinka Gaadiidka Dadweynaha iyo Xarumaha Gaadiidka](#)
- [Tallooyinka Caafimaadka Dadweynaha: Xirashada Maaskarooyinka, Waji Daboolayaasha iyo Gaashaamada Wajiga iyo Ka fogaanshaha Jireed ee Goobaha Dadweynaha](#)
- [Hanuuninta CDC: Nadiifinta iyo Jeemis-dilka Xaruntaada](#)

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.